

COVID-19: Xaquuqda kireystaha iyo dhamaadka Hakinta Guri ka Saaritaanada

COVID-19: Renter's Rights and the end of the Eviction Moratorium

Amarkii hakinta guri ka saaritaanka ee Minnesota waa uu dhamaaday waqtigisii. Hadii kiro lagugu leeyahay, waxa aad ka heli kartaa caawimaad kaa ilaala adiga guri ka saarida RentHelpMN.org. Warqadan xogta aruursan ahi waxa ay sharaxdaa kolka uu guri ka saaritaanku bilaabmayo, sababaha guriga la isaga saaro, iyo waxa aad sameyn karto si aad caawimaad u hesho.

Ogow: Ogaysiska lagu joojinayo heshiiska liiska aad guriga ku degan tahay la mid maha guri ka saarida. Hadii ay qolada aad guriga uga jirtaa ay tira liiskaagu waa dhamaanayaa. Tag qaybta hoose ee ku saabsan Heshiiska liisyada si aad wax uga ogato xaquuqdaada.

Maxaa dhici hadda maadaama Xaaladdii Degdeg ahayd ay dhamaatay?

Qaar ka mid ah guri ka saaritaanka waa la ogolaaday mar labaad, laga bilaabo Juun 30, 2021

Qolada guriga aan uga jiraa ma iga saari karaa guriga?

Laga yaabee. Mulkiilayaashu waxa ay ka xareysan karaan kiisas guri ka saarid ah maxkamad. Laakiin waxaa jira dhowr xeerar cusub ah sababtoo ah cudurka COVID iyo amarka hakinta guri ka saarida si loo caawiyo kireystayaasha.

Sida qaalibka ah, waxaa jira sababo kala duwan oo quseeya sababta uu mulkiilaha guri qof uga saarayo. Dhaqsaha uu mulkiilahu ku xareysan karo dacwada guriga kaa saarida ah waxa ay ku xiran tahay sababta uu mulkiilahu guriga kaaga saarayo.

Dhaqso siddee ah ayuu mulkiilaha guriga iiga saari karaa hadii aanan bixin kirada?

Haddii aadan ka dalban gargaar dhanka kirada ah shabakada www.RentHelpMN.org/so, hadda samee! Wixa aad heli waqtidheeraad ah oo ku sii jirto guriga hadii aad hesho gargaar dhanka kirada ah AMA hadii aad dalbatu gargaar dhanka kirada ah aadna ka sugayso iyagu inay go'aan ka gaaraan codsigaaga. Haddii aad dalbatay gargaarka dhanka kirada ah mulkiilaha gurigaagu ma uu xareysan karo dacwo guri ka saarid ah ilaa laga gaarayo Sebteembar 13, 2021. Kolkaa uun waxa u xareysan karaa hadii laguu diiday gargaarkii kirada ahaa ama aadan bixin kirada.

Ka eeg qaybta hoose ee "Kirada Aan Wali la Bixin & Gargaarka Dhanka Kirada" wixii faahfaahin ah ee ku saabsan guri ka saaritaanada iyo kirada aan wali la bixin.

Sababtee kale ayaa guriga la iiga saari karaa?

Waa laguu keeni karaa warqadaha guri ka saarida hadii qolada guriga lahi ay tiraax waxaad sameysay mid ka mid ah waxyaabahan soo socda:

- Aad khatar weyn gelisay cid kale
- khasaare weyn aad u geysatay hanti
- Jabinta sharciyada, sida: hayshada mukhaadaraadka sharci-darradda ah, hubka sharci-darrada ah, dhalaysiga, ama haysashada alaab la soo xaday
- aadan bixin karada aadna xagu leedahay gargaarka dhanka kirada laakiin aadan dalban gargaar dhanka kirada ah ama aadan tusin mulkiilaha guriga inaad dalbatay gargaarka dhanka kirada ah.

Qolada gurigu waa khasab inay ka xareysto dacwo guri ka saarid ah maxkamad ayna raaco xeerarka guri ka saarida. Hadii laguu siiyo ogaysiis guri ka saarid ah mid ka mid ah sababaha, hubi inaad tagto dacwo dhagaysigaaga. Dacwadaada waxaa dhici karta in la qaado iyadoo maxkamada la wada joogo ama waxaa dhici karta in kumbuyutarka lagu qaado. Nidaamka guri ka saarida ee Minnesota waa mid aad degdeg u ah. Hel talo dhanka sharciga ah markiiba. Ka akhri warqadayada xogta aruursan ee [Guri ka Saarida](#) wixii kale ee akhbaar ah.

Waa maxay xeerarka ka degsan guri ka saaridu?

Warqadaha maxkamada ee guri ka saarida waxaa la yiraa U yeerida iyo Ashtakada. Waa khasab inaad hesho warqadaha maxkamada ugu yaraan 7 cisho ka hor waqtiga dhagaysiga dacwada.

LAAKIIN, haddii sababta guri ka saaridaadu ay tahay bixin la'aan kiro, xeerka cusubi waxa uu leeyahay waa kasab in mulkiilaha gurigu uu ku siiyo 15-cisho oo ogaysiis ah halkii uu kaa siin lahaa 7-cisho inta laga gaarayo bisha Oktoobar 12, 2021 waana khasab in ogaysiisku uu yiraa:

- amarkii hakinta guri ka saaritaanadu waa uu dhamaaday, gurigana waa lagaa saari karaa
- Cadadka guud ee lacagta kirada ah ee lagugu leeyahay
- Sida lagu helo gargaarka dhanka kirada ah (211, RentHelpMN)

Waa adag tahay in la ogaado waxa ka dhici doona maxkamada. Waxa ay go'aansan kartaa maxkamadu hadii ay tahay inaad guurto, inta uu yahay waqtiga aad haysato ee aad ku guuri karto, hadii ay tahay inaad bixiso kirada lagugu leeyahay, ama inaad sii joogi karto guriga hadda aad ku jirto ka dib dhagaysiga dacwada maxkamada. Laakiin nidaamka guri ka saarida ee Minnesota waa mid aad degdeg u ah. Hel talo dhanka sharciga ah markiiba. Ka akhri warqadayada xogta aruursan ee [Guri ka Saarida](#) wixii kale ee akhbaar ah.

Ogow: Dadka aan sharciga lahayni waxa ay leeyihiiin dhamaan isla xaqquqdaa guryaha kolka ay noqoto guryaha iyo guri ka saaritaanada.

Ma la iiga saari karaa guriga ku xad-gudubka heshiiska guriga aan ku deganahay?

Haa, Mulkiilaha gurigu waxa uu xareysan karaa dacwo guri ka saarid ah hadii aad jabiso xeer muhiim ah oo la yiraa "si weyn u jabinta heshiiska guriga" ka dib Luulyo 14, 2021. Waa khasab

inay raacaan xeerarka caadiga ah ee u degsan guri ka saarida. Waxay kaloo kuu sheegi karaan inay joojinayaan ama aysan kuu cusboonaysiinayn heshiiska aad ku degan tahay guriga sababtan awgeed.

Mulkiilaha guriga aan ku jiro iska lehi guri ma iga saari karaa isagoon maxkamad marin?

Maya. Mulkiilaha gurigu waa khasab inuu maxkamad tago marka hore uuna raaco sharciyada guri ka saarida. Mulkiilaha guriga lehi guriga kaama xiran karo mana sameyn karo wax kale si aad u tagto. **Haddii tani ay dhacdo wac ka bilayska (911) wacna iyana xafiiska Gargaarka Sharciyada (Legal Aid) markiiba.** Ka eeg warqadayada xogta aruursan ee [Guri ka xirashada ama ka Goynta Biyaha iyo Korontadu waa Sharci-darro.](#)

Shariifku guriga ma iiga saari karaa “amaraka maxkamada” ee guri ka saarida?

Hadii lagaaga adkaado kiiskaaga guri ka saarida, ha u hogaaansamin heshiis waanwaan ah, hana u goyn maxkamad, xaakimku waxa uu amri karaa “amar maxkamadeed” oo guri ka saarid ah. Amarkani waa warqada siisa shariifka ruqsada inuu kuu yimaado oo uu kugu khasbo inaad baxdo. Haddii aad is leedahay maxkamadu khalad ayey sameysay, waa inaad guriga ku sii jирто, ka dibna aad wacdo xafiiska [Gargaarka Dhanka Sharciyada](#) (Legal Aid) markiiba.

Ogow: Hadii aad haysato amar loo hakiyey cudurka dillaacay awgii, waxaa amarkaa la oofin karaa markii la rabo. La xiriir hay’ada Gargaarka dhanka sharciyada (Legal Aid) markiiba hadii Shariifku uu isku dayeyo inuu kaa saaro guriga aad ku jирто.

Kirada Mudaddii la Bixin Lahaa La soo Dhaafay & Gargaarka Dhanka Kirada ah

Dhaqso siddee ah ayuu mulkiilaha guriga aan ku jiro iiga saari karaa?

Haddii aadan ka dalban gargaar dhanka kirada ah shabakada www.RentHelpMN.org/so, hadda samee! Waa aad heli waqtii dheeraad ah oo ku sii jирто guriga hadii aad hesho gargaar dhanka kirada ah ama hadii aad dalbato gargaar dhanka kirada ah aadna ka sugayso iyagu inay go’aan ka gaaraan codsigaaga. Haddii aad dalbatay gargaarka dhanka kirada ah mulkiilaha gurigaagu ma uu xareysan karo guri ka saarid ah ilaa laga gaarayo Sebteembar 12, 2021. Kolkaa kaliya waxa u xareysan karaa hadii laguu diiday gargaarkii dhanka kirada ahaa ama aadan bixin kirada.

Waxaa kaloo jira sharci wadanka oo dhan ka jira oo ay leedahay hay’ada Xarumaha Xakameynta (CDC) oo kaa ilaalinaya adiga guri ka saarida ilaa iyo bisha Luulyo 31, 2021. Sida sharciguna qabo, hadii aadan bixin karin kirada iyadoo sababtu tahay cudurkan Dillaacay awgii, guriga aad ku jирто lagaama saari karo. Haddii aadan xaq u lahayn caawinta dhanka kirada ah, sharcigan wadanka oo dhan ka jiraa wali waa uu ku ilaalin ilaa iyo bisha Luulyo 31, 2021. Haddii ay taasi dhacdo, waa inaad siiso mulkiilaha guriga aad ku jирто warqad. Warqaddu waxa ay u baahan tahay inay dhigayso akhbaar ku saabsan xaaladaada. Kani waa foomka hay’ada CDC da: [https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/downloads/EvictionDeclare_d508.pdf.](https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/downloads/EvictionDeclare_d508.pdf) (ingiriisi kaliya)

Maxaa dhici haddii aanan dalban gargaar dhanka kirada ah?

Hadii aad xaq u leedahay gargaarka kirada laakiin aadan dalban ama aadan siin qolada guriga aad uga jirto akhbaar ah inaad dalbatay, kolkaa guriga waa lagaa saari karaa. Dalbo gargaarka dhanka kirada ah!

Ka waran haddii la ii diiday gargaarka dhanka kirada ah?

Hadii aad dalbatay gargaarka dhanka kirada ah, laakiin lagugu yiri xaq uma aad lehid kolkaa heshiiska liiska guriga aad ku degan tahay waa la joojin karaa, ama guriga ayaa lagaa saari karaa. Wuxuu aad haysataa wuxuun waqtii oo uu kirada lagugu leeyahay aad ku bixiso ka hor inta aysan tani dhicin.

Hadii aadan xaq u lahayn gargaarka dhanka kirada ah aadana wali bixin kirada, kolkaa qolada gurigu aad uga jirtaa waxay sameyn karaan in:

- Ay joojiyaan ama aysan cusboonaysiin heshiiska guriga aad ku degan tahay laga bilaabo bisha Agoosto 13, 2021
- Ay dacwo guri ka saarid ah xareystaan wixii ka dambeeya bisha Septeembar 12, 2021

Xeerku waxa uu leeyahay qolada guriga aad uga jirtaa guriga kaama saari karaan hadii aad wali sugayso jawaab ku saabsan codsigaaga gargaarka dhanka kirada ah. Socoshada ay wali socoto oo aan la dhamayn hawsha codsaigaaga macnaheedu ma aha in lagu diiday.

Ka waran hadii aan dalbado gargaarka dhanka kirada ah aanana wali jawaab ka hayn?

Hadii qolada guriga aad uga jirtaa ay rabto inay guriga kaa saarto iyadoo sababtu tahay inaad bixin kiradii AADNA dalbatay gargaarka dhanka kirada ah, kolkaa guriga lagaama saari karo inta aad sugayso go'aanka codsigaaga laga gaarayo.

Guriga aad ku jirto lagaama saari karo ilaa laga gaarayo bisha Juun 1, 2022 ama inta codsigaaga go'aan laga gaarayo hadba labada kii soo hor mara.

Hadii ay ku waydiisato, waa inaad siiso qolada guriga ama maxkamada:

- Cadeyn ah inaad xareysay codsi ku saabsan gargaarka dhanka kirada
- Sababta dib u dhaca hawsha codsigaaga hadii aad ka heli karto akhbaartaa RentHelpMN.org.

Ciddee ayaa xaq u leh gargaarka dhanka kirada ah?

Booqo shabakada www.renthelpmn.org/so/learn-more hadii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan cidda xaqqa u leh iyo sida hawsha codsigu ay u shaqeeyso. Haddii aadan hubin inaad xaq u leedahay: Iska dalbo gargaarka!

Joojinta Heshiiska Liiska Ama Dhibaatooyinka Guriga Wax la Halaysan ah?

Hadii aad qabto su'aal ama ay dhib kugu hayso qolada gurigu, mar walba ka bilow hawsha eegida waxa uu heshiiska liiska leeyahay. Waa inuu yiraa inta ay tahay mudadda uu heshiiska liisku jirayo, inta ay tahay mudadda ogaysiiska ah ee loo baahan yahay si loo joojiyo heshiiska liiska guriga ama adigu jooji ama qoladda gurigu ha joojisee, kolka kirada la kordhin karo, hadii lagugu soo dalaci karo khidmad la soo daahid ah hadii aad la soo daahdo kirada iyo xeerar kale.

Ka waran hadii uu heshiika liiskaygu uu dhamaanayo dhawaan, ama ay qoladu guirgu I siiso ogaysiis ah inaan ka guuro?

Qolada guriga aad uga jirtaa waa ay joojin kartaa heshiiska liiska laakiin waa inay ku siisaa mudada ogaysiiska ah ee ku qoran heshiiska. Ogaysiisku lagu joojinayo heshiiska liiska gurigu ma aha mid la mid ah guri ka saarida. Ogaysiiska ama ogaysiiska guuridu macnahiisu waa in aan heshiiskii guriga aad ku daganayd aan la cusboonaysiinayn aadna u baahan tahay inaad guurto maalin cayiman. Hadii aadan guurin maalintaa cayiman, taa waxaa loogu yeeraa "sii haysasho."

Hadii aad sii 'haysato" guriga oo aadan guurin maalinta ugu dambaysta ah ee lagu qabtay inaad guurto, qolada guriga aad uga jirtaa waxaa dhici karta inay kaa xareysto adiga dacwo guri ka saarid ah hadii aad wali halkaa ku sii nooshahay. Waxaa dhici karta iyana inay kugu soo dalacaan kirada waqtiga siyaadaha ah ee aad guriga sii joogto.

Si taxadar leh u eeg heshiiska liiskaaga si aad u eegto waxa dhaca haddii aad guriga sii joogto ka dib kolka mudadda heshiiska liisku ay dhamaato. Hadii aad sii wado bixinta kirada qolada guriguna ay kirada ay sii wado inay kaa aqbasho, waxaa dhici karta ina la kordhiyo mudadda liiska.

Ka Akhri Wixii kale ee akhbaar Dheeraad ah ee ku saabsan [Ogaysiiska Banaynta Guriqa iyo Joojinta Liiska](#) Warqada xogta aruursan.

Qolada guriga aan uga jiraan waxa ay tiri waxa aanu u joojinaynaa heshiiska liiska guriga aad ku degan sabab ah "jabin muhiim ah," oo heshiiska ah, taa ma ay sameyn karaan?

Qolada gurigu waa ay joojin kartaa heshiiska liiska guriga aad ku degan tahay hadii aad jabisay qayb muhiim ah oo ka mid ah heshiiska. Taa weeye waxa "jabinta muhiimka" ah macnaheedu yahay. Waa inay kuu sheegaan waxay uu xad-gudubku ahaa.

Ka waran haddii guriga aan ku jiraan uu u baahan yahay hagaajin?

Xataa hadii kiro lagugu leeyahay, waxa aad xaq u leedahay inaad codsato in guriga lagaa hagaajiyo.

Wixii hagaajin degdeg loogu baahan yahay ah, sida, biyo la'aan, ama biyo kulul la'aan, ama albaab aan quful lahayn, ka bilow inaad wacdo marka hore qolada gurigu. Hadii qolada gurigu

aysan ku hagaajin waxa halaysan 24-saac gudahood, wac xafiiska Gargaarka Dhanka Sharciyada (Legal Aid) markiiiba. Warqada xogta aruursan ee [Dhibaatooyinka Dayactirka ee Degdega Ah.](#)

Hadii aad u baahan tahay hagaajin aan degdeg ugu baahnayn in wax looga qabto, ka bilow inaad ugu sheegto qolada guriga qoraal ahaan wxii dhib ah ee u baahan in la hagaajiyo. Hadii ay magaaladu leedahay waax qaabilسان fatashaadaha, iyagana waa aad wici kartaa.

Hadii aysan qolada guriga wixii ka halaysan aysan hagaajin 14-cisho ka dib, waxaa dhici karta inaad awoodi karto inaad ka xareysato kiis dacwo maxkamad. Wac xafiiska Gargaarka Dhanka Sharciyada (Legal Aid) si aad wax uga ogato arrintan. Maxkamada degmadaadda waxaa dhici karta inay leedahay xeerar gaar ah oo quseeya kiraystayaasha u baahan in laga caawiyo hagaajinta guriga ay ku jiraan. Eeg warqadayada xogta aruursan ee [Ka Helida Qolada Gurigu Inay Hagaajiso Wixii Halaysan.](#)

Waa sharci-darro in qolada guriga aad uga jirtaa ay kaa gooyaan biyaha, konontada, gaaska. Hadii qolada aad guriga uga jirtaa ay saa sameyso, wac xafiiska Gargaarka Dhanka Sharciyada (Legal Aid) markiiiba.

Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2021 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuql kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganaci ah waa mid si adag loo mamnuucay.